

# Fursadda hore ee Maqalka

EARLY HEARING DETECTION AND INTERVENTION (OGAANSHAHA XILLIGA HORE IYO WAXQABADKA MAQALKA DHEGAHA AMA) (EHDI)

## Mid ka mid ah waxyaabaha ugu yaabka badan ilmaha waa in ay luuqad baran doonaan.

Marka ay dhashaan ka dib, maskaxda nuunnaha si degdeg ah ayey u kobceysaa. Wakhtigaas badanaa waxaa la yiraahdaa “fursadda hore ee maqalka” ee barashada luuqadda. Inta badan nuunnyaashu waxay isticmaalaan dhegaha, indhaha, iyo dareemayaasha kale si ay wax ugu bartaan. In ay wax daawadaan oo ay wax dhageystaan, waxa ay ku baranayaan macnaha ficillada iyo dhawaaqyada iyo sida ay u sheeganayaan waxa ay dareemayaan iyo waxa ay rabaan.

## Nuunnyaasha ah dhegoolaha iyo kuwa dhegaha culus waxay u baahan yihiin caawimaad degdeg ah si ay luuqad u bartaan.

Carruurta lagu caawiyo barashada luuqadeed, hadal afka ah iyo sida gacamaha loogu hadlo, ka hor inta aysan gaarin lix bilood badanaa waxay luuqadda u baran karaan si la mid ah sida carruurta uu maqalkoodu caadiga yahay. Guushoodu waxay ku xiran tahay sida ay goor hore wax ugu qabtaan qoyska iyo xirfadleyaashu.

Hadda ayaad haysataa “fursadda hore ee maqalka” ee aad ilmahaaga ugu heli karto tasiilaad ah barashada luuqadeed ee uu ilmuhu u baahan yahay.



Faahfaahin ah barasho luuqadeed si aad nuunnaha ugu hesho caawimaadda ugu fiican.



[www.mnlowincidenceprojects.org/Projects/ehdi/ehdiCommunicationOpp.html](http://www.mnlowincidenceprojects.org/Projects/ehdi/ehdiCommunicationOpp.html)